Xeerarka Rakaabka

- Sii faahfaahinta safarka dhamaanteed isku xiraha (tusaale: xayawaanka cuuryaanka kaalmeeya, gelbiyaha/dhaweeyaha, kaalmada loo baahan yahay, iwm.) Codsiyada dalabkoodu macquulka yahay waa in la sameeyaa wakhtiga safarka balantiisa la dhigayo
- Darawaladu isbeddel kuma samayn karaan safarka loo qorsheeyay ilaa marka uu xafiiska diritaanka soo cadeeyo
- Diyaar u noqo marka baskaagu yimaado oo keen qiimaha saxda ah (ama waxa lagu raaco baska) marka aad baska raacayso
- Looma ogola cunto ama cabitaan furan baska gudihiisa
- Shaarar iyo kabo in lagashanado waa lebbiska loo baahan yahay
- Rakaabka oo dhan **WAAJIB** ayay ku tahay in ay xirtaaan suunka oo ay fadhiyaan ilaa basku si dhammaystiran u joogsado
- Xayawaanka oo dhami waa in ay ku jiraan sidaha marka laga reebo xoolo adeega cuuryaaminta
- Lama ogola sigaar cabbid, dagaal, ama wax tuuris
- Isticmaalka khamriga waa ka mamnuuc baska
- Hubku waa ka mamnuuc baska
- Wax dareere ah oo guban kara ama baytariyada baabuurta looma ogoal baska
- Weligaa ha faragelin hawsha baska
- Ixtiraam wadayaasha iyo rakaabka kale.
- Luuqadda iyo hab-dhaqanka loo tarjumi karo weerar ama hanjabaad waa mamnuuc waxayna keeni kartaa in adeegyada lagaa joojiyo
- Tri-CAP kama masuul aha alaabta baska lagaga tago
- Xeerka Xirmadaha Alaabta: Si loo dhowro raaxada iyo badbaadada rakaabka dhammaantood rrTri-CAP, xirmadaha alaabta qofka waxay ku koobnaan doonaan qaddarka rakaab kasta uu qaadi karo hal safar. Alaabta lagu qaado baska waa in uu haystaa rakaabka mana xayiri karaan meesha la maro ama kursiga curyaanka. Darawaladu waxay howshoodu ku koobah tahay inay ku caawiyaan rakaabka hal safar oo kaliya waxay ka qaadi doonaan kuna soo dejin doonaan xirmadaha alaabata jidka iyo guriga dhiniciisa. Rakaabka waxaa loo ogol yahay in ay ku safraan gaari gacan 2-logood leh iyo in ay qaataan xirmad alaab oo isku darka culeyskeedu aanu ka badneyn 35 rodol(pounds). Rakaabka waxaa looga baahan yahay inay sameytaan qaabab kale haddii loo baahdo gargaar dheeraad ah. Waxyaalaha ka reebban nidaamka sharcigaan waxaa loo samayn doonaa rakaabka ka safraya goobaha cuntada lagu qeybiyo ee deegaanka.

Gaadiidka Tri-CAP waxay xaq u leeyihiin inay u diidaan gaadiidka qof kasta oo aan u hoggaansamin heerarka adeegyadaan.

Hadafka Tri-CAP:

Hadafka Tri-Cap waa in la balaariyo fursadaha dhaqaale iyo fayoobi qabka ee dadka deggankeena degan iyo bulshadeena

Barnaamijyada kale ee laga bixiyo Tri-CAP

- Kaalmada Guriyeynta
- Kaalmada Tamarta
- Barnaamijka Caawinta Nafaqada Dheeraadka ah (SNAP)
- Kaalmada Cashuuraha
- Dib u dhiska Nolosha
- Family Assets for Independence in Minnesota (Hantida Qoyska ee Madaxbanaanida Minnesota) (FAIM)

Faallooyinka Rakaabka & Cabashooyinka

Faallooyinka iyo cabashooyinka waxaa laga diiwaan gelin karaa Agaasimaha Gaadiidka adiga oo ka wacaya lambarka degaanka ee
320-251-1612, lacag la'aan 888-765-5597, ama qoraal ahaan Agaasimaha Gaadiidka Tri-CAP,
P.O. Box 683, Waite Park, MN 56387-0683.
Waxa kale oo aad nagala soo xiriiri kartaa general@tricap.org

Qofna looma diidi karo raacitaan gaadiika iyada oo lagu saleynayo isir, midab, asal qaran, diin, jinsi, naafo jireed ama maskaxeed, xaaladda guurka, xiriirka siyaasadeed, heerka kaalmada dadweynaha, nooca galmada, ama heerka ciidannimo.

Tri-CAP INC.
TRI-COUNTY ACTION PROGRAM
Helping People. Changing Lives.

Gaadiidka Hagaha Rakaabka

Tri-CAP Transit Connection(Isku xirka Tri-CAP)
waa barnaamijka gaadiidka **dadweynaha** ee ay ka go'an tahay inuu bixiyo adeeg gaadiid-raac oo badbaado leh, la isku halleyn karo, la awoodi karo, oona xushmad leh

(320) 251-1612
(888) 765-5597
www.tricap.org

Warbixin guud

Gaadiidka Tri-CAP waa gaadiidka dadweynaha u fidiya adeega baska dadweynaha iyada oo aan la sameyneynin takoor da', dakhli, ama shuruudaha u-qalmitaanka.
Basaska Tri-CAP waxay ku qalabaysan yihiin wiishash si loo qaado kuraasta curyaanka, mootooyinka iyo waxyaalaha kaalmeeya caawimo. Gaadiidka Tri-CAP waxay sameeyaan ka qaadid iyo geyn goob ilaa goob kale ah adeegg ah oo ay heli karaan dhammaan shakhsiyaadka isticmaalaya adeegyadayada.

Rakaabku waa in ay keenaan dhaweeyahooda ama adeegaha gaarka ah haddii heerka adeeggu oo sarreeya loo baahan yahay Raacitaannada baska waxa la balansadaa ilaa laba toddobaadyo ka hor. Baladhigasho waqti hore ah ayaa lagu talinayaa si maadaama dhammaan rakaab qaadinaanka balamahooda ay ku xiran loo dhigo sida loo soo kala horeeyay nidaam ah. Marka ay suurtogal tahay, waxaanu smayn doonaa balan isla maalinta ah, oo ah lacag dheeraad ah. Dhammaan codsiyada adeega baska waa in la sameeyaa adigoo wacaya Tri-CAP
Xarunta xiriirinta. Kansalidda/Joojinta raacitaanka waa in la sameeyaa 24 saacadood ka hor mar kasta oo ay suurtagal tahay. Iyada oo ku xiran go'aanka shaqaalaha xafiiska Tri-CAP, baajinta
in ka yar 24 saacadood waxa lagu qeexi karaa ballamaha la iska maqnaaday taas oo keeni karta digniin.
Tri-CAP waxay xaq u leedahay inay hakiso adeegga ka dib 3 iska maqnaansho (no-shows).

Maalmo Adeegu Aanu Jirin
Xafiisku waa xiran yahay oo ma jiro adeeg bas tiro fasaxyo qaran ah iyo maalmo shaqada gudaha ah sanadka oo dhan. Fadlan booqo bogeena internetka www.tricap.org ee liiska hadda jira ee maalaha aanu adeegu jirin.

Ka hubi shabakadeena warartkii ugu danbeeyay ee xiritaanada iyo macluumaadka jidka

Xiritaanka la Xiriira Cimilada ama Xaaladaha Degdegga ah ee lagu dhawaaqay cajalada codka fariimaha ee xafiiska iyo sidoo kale xarumaha soo socda:
WJON AM 1240 iyo WWJO FM 98.1 ee St. Cloud, KASM AM 1150 iyo KDDG FM 105.5 gudaha Albany iyo WQPM 1300 AM, KCLD 104.7 FM St. Cloud iyo KFML FM 94.1 Little Falls.

Qiimaha buska

Qiimo sax ah ayaa loo baahan yahay marka baska la raacayo. Darawaliintu ma samayn karaan lacag sarifid.

- Safarrada magaalada gudaha waa $1.25 halkii ee markii la raaco
- Safarrada miyiga waa $3.00 halkii ee markii la raaco
- Ilaa laba carruur ah oo da'doodu 5 sano iyo wixii ka hooseeya ayaa ku raaci kara baska bilaash marka ay la socdaan qof weyn oo lacag bixiyay
- Ilaa laba carruur ah oo dheeraad ah, da'dooduna tahay 5 sano iyo wixii ka yar, ayaa ku raaci kara ½ qiimo marka ay la socdaan qof weyn oo lacag bixiyey
- Qiimaha maalintaas ayaa ah .75 senti oo dheeraad ah safarkiiba
- Heerarka lacagaha baabuur raaca waa la bedeli karaa
- Jidadka miyiga ah ma shaqeeyaan haddii rakaabku ka yar yihiin 5 rakaab ah

Maxaad ka filan kartaa

- Saaxiibtinimo, Darawaliinta iyo Isku xireyaal Wanaagsan
- Shaqaalaha Gaadiidka Tri-CAP waxay u hoggaansamaan dhammaan xeerarka federaalka, gobolka, iyo deegaanka ee khuseeya
- Waxaan ilaalinaa goob shaqo oo aan daroogo iyo aalkolo lahayn
- Darawalada ayaa ku siin doona gargaarka aasaasiga ah hadba sida loogu baahdo si rakaabka si badbaado leh ay baska ugu soo galaan ugana soo degaan
- Baabuurku wuxuu ahaan doonaa mid nadiif ah oo ku siin doona jawi ammaan ah
- Dhammaan wadayaasha baska waxay haystaan laysin CDL ah waxayna raacaan sharciyada iyo qawaaniinta wadista ee Gobolka Minnesota
- Darawalada basaska waxaa loo tababaray gargaarka degdega ah ee aasaasiga ah
- Darawalada basaska waxaa loo tababaray isticmaalka wiishka iyo xiritaanka saxda ah ee qalabka socodka loo isticmaalo

Xarunta Isku Xirka

Isniin-Jimco, 8:00 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo
Sabti 8:00 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo
320-251-1612 or 888-765-5597

Farimaha waxa lagu reebi karaa cajalada codka fariimaha saacadaha dambe ee aan la shaqeyn iyo waqtiyada fasaxyada. Farimaha waxaa dib loo eegaa maalinta shaqada ee xigta ee caadiga ah.

Si aad u Sameysato Balanta Safarkaaga

- Wac Xarunta Isku Xirka ee Tri-CAP
- Rakaabka marka ugu horeysa waxaa la waydiin doonaa magaca, ciwaanka guriga, lambarka taleefoonka, qofka la xiriirka degdega ah iyo taariikhda dhalashada
- Sii isku xiraha macluumaadka safarka oo faahfaahsan oo ay ku jiraan magaca, taariikhda, wakhtiga safarka ee loo baahan yahay, ciwaanka qaadista iyo meesha aad u socoto
- Waxaa lagu talinayaa in aad siiso ugu yaraan 30 daqiiqo wakhtiga safarka laga soo bilaabo qaadista ilaa imaanshaha ballamaha wakhtiga loogu talagalay
- Aqoonsiga qof kasta/dhammaan rakaabka kula safraya (dhaweeyaha ama kaaliyaha bus raacista waa bilaash)
- Bixi macluumaad kasta oo ku saabsan gargaarka loo baahan karo (tusaale: xayawaanka adeegga, dhaweynta, gargaarka loo baahan yahay iwm.). Codsiyada dalabkoodu macquulka yahay waa in la sameeyaa wakhtiga safarka balantiisa la dhigayo
- Haddii aad ogtahay mudada aad joogi doonto meesha aad u socoto, isku xiraha ayaa kaa caawin doonta balanta soo noqoshadaada
- Sii macluumaad kasta oo shakhsi ah oo la cusboonaysiiyay (isbeddelka lambarka taleefanka, baahiyaha dhaqdhaqaaqa la xiriirta, iwm.)
- Haddii aad qorshaynayso in meelo dhow ah sii istaagtoo sii xogtaas isku xiraha wakhtiga aad balanta dhiganeysid
- Isku xirahaagu wuxuu isku dayi doonaa inuu ku waafajiyo wakhtiga soo qaadida ee balan jirta. Isku xiruhu wuxuu soo jeedin doonaa wakhti kale oo soo qaadis ah haddii codsigaaga aah la fulin karin. Baska Tri-CAP waxa laga yaabaa inuu yimaado **10 daqiiqo** ka hor ama ka dib waqtiga qaadista loo qorsheeyay.

Dhammaan jadwallada waa la bedeli karaa